

TALLAALKA CAABUQA KOOFID-19

**Iskaangaree calaamaddaan lambarka  
Jawaabta Deg Degga ah (QR code) si  
aad hadda isku diiwaangalisid  
tallaalka caabuqa KOOFID-19**



**Wixii xogo dheeraad ah ka ogow bartaan.**  
[fraserhealth.ca/vaccine](https://fraserhealth.ca/vaccine)

#BCimmUNITY  
#BCCommunityImmunity



## TALLAALKA CAABUQA KOOFID-19

### Waxaad raacdaa saddexdaan tallaabo ee fudud:

#### 1. Waxaad iska diiwaangalisaa khadka internetka, telefoonka ama qof ahaan u tag

- Khadka Internetka: [gov.bc.ca/getvaccinated](https://gov.bc.ca/getvaccinated).
- Qof ahaan: booqo xarunta Adeegga Biritish Kolombiya (Service BC) ee kuugu dhow.
- Telefoonka: 1-833-838-2323 (Waa lacag la'aan).
- Turjumaano waa la heli karaa. Markaad wacdid sug inta turjumaanku khadka ka soo galayo.
- Telefoonka dadka maqalka naafada ka ah ama maqalka dhagaha culus: 7-1-1
- Waxay furan tahay toddoba beri asbuucii, 7:00 a.m. ilaa 7:00 p.m.

Qof kasta oo ku nool, ka shaqeynaya ama wax ka baranaya Biritish Kolombiya wuxuu heli karaa tallaalka caabuqa KOOFID-19 oo lacag la'aan ah. Uma baahnid in aad leedahay Lambarka Caafimaadka Gaarka ah (Personal Health Number) ama Kaarka Adeegyada Biritish Kolombiya (BC Services Card). Tallaalka si aad u qaadatid uma baahnid in aad leedahay sharciga Dhalashada Kanada ama degganaanshada rasmiga ah.

#### 2. Ballan qabso

Markaad is-diiwaangalisid ka bacdi, waa lagu la soo xiriiri doonaa si aad u qabsatid ballanta tallaalka sida ugu dhakhso badan markaad xaq u yeelatid. Waxaad ballantaada ka qabsan doontaa khadka internetka ama telefoon. Waxaad dooran doontaa goobta, taariikhda iyo wakhtiga.

#### 3. Tallaalka qaado

Booqo rugta tallaalka si aad u soo qaadatid tallaalkaaga.